

Heshiis ay galeen East Africa University Bosaso – Galkacyo iyo FTMS (Malaysia)**Sawirada Heshiiska Halkan ka daawo.....**

Xaflad lagu Maamusay heshiis ay kala saxiixdeen Jaamacadda Bariga Africa iyo machad lagu magacaabo FTMS global oo fadhigiisu yahay Magaalada Kuala Lumpur ee dalka Malaysia.

Xafladan oo si wada jir ah looga qeyb qaatey ayaa xalay waxay ka dhacday Xarunta Jamacadda Bariga Africa oo ay goob joog ka ahaayeen wafdi kasocda machadka FTMS iyo E.A.U iyo waliba Masuuliyiin sar sare oo ka socotay Maamul Gobaleedka Puntland , Shirkadaha, Ganacsatada, Culuma awdiinka, Aqoonyahanada, Dhalinyarada iyo dhamaan qeybaha bulshada oo dhan.

Masuuliyiin badan oo halkaas kahadashey ayaa u mahad celisay islamarkaana soo dhaweysay heshiiskan cusub ee ay kala saxiixdeen Machadka FTMS iyo E.A.U. ayaa aad loogurajawaynyahay in uu isbadal xaga aqoonta ah kusameeyo guud ahaan umada Somaaliyeed gaar ahaan mushtamaca reer Puntland.

Eng: Sayid Maxamed C/le Xasan oo ah isku xiraha E.A.U and FTMS islamarkaasna horkacayay waftigaas, in badana ku hawlanaa kor uqaadida iyo tayaynta waxbarashada mandaqada ayaa faah faahin dheeraad ah ka bixiyay ujeedada Heshiiskan iyo ardayda Malaysia waxkabarata faa'iidooyinka iyo khasaaraha ay dalkaas kala kulmeen.

Waxaa xafladaas lagasheegay in waxbarashadaan cusub ee kusoo siyaaday mandaqada ee udhaxaysa FTMS iyo E.A.U ay si buuxda uga hirgalayso guud ahaan mandaqada Puntland, laakiin hadda si rasmi ah ugabilaabanayso meelaha Jamacadu xarumaha kuleedahay sida: Boosaso, iyo Galkacyaba.

Mr. Trevor Ward iyo Abdul Aziz Tanko oo ahaa waftigii ka socday Machadka FTMS ee fadhigiisu yahay Wadanka Malaysia ayaa waxay si wada jir ah ugu mahad celiyeen dhamaan Madaxda Jaamacadda Bariga Africa iyo Madaxda sare ee Dawlad G/leedka Puntland oo qeyb weyn ka qaadatay Soo dhaweyntooda.

Mr. Trevor oo ah nin u dhashay wadanka Britain ahna Madaxa sare ee Machadka FTMS ayaa wuxuu beeniyey in Gobolada Puntland ay kajirto Amaandarada idaacaduhu buun buuniyaan. Hadase waxan ogaaday Xaqiiqda ayuu yiri Mr. Trevor, wuxuu kaloo balan qaaday Mr.Trevor inuu si aan kala go'laheyn ula shaqeyn doono Jaamacadda Bariga Afria.

Iskusoo wada duuboo waxay xafladii ku dhamaatey jawi wanaagsan farxadnagalaysay labadii dhinac ee heshiisku dhexmarey iyo dhamaan dadwaynihii kasooqaybgalay. Mahadaasna waxay usugnaatay allah subxaanahu watacaalaa iyo ragii hawshaas soo dhameeyay oo uu ka'mid ahaa Eng. Sayid.

Suxufi: Farxan Yasin Mire (isqootax)

isqootax@hotmail.com

Faafin: SomaliTalk.com | July 28, 2008

Kulaabo bogga www.SomaliTalk.com © www.SomaliTalk.com

La soo xiriir: webmaster@somalitalk.com

Copyright © 1999-2008 SomaliTalk.com All rights Reserved.